

Adoo hada isu diiwaan geliyey dugsi...

Maxaa ku xiga?

Waad ku mahadsan tahay inaad ilmahaaga ku diiwaan gelisey Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) sanad dugsiyeedka 2009-2010. Hambalyo xaga dhamaystirka talaabadan muhimka ah ee hanaanka doorashada dugsi!

Kadib markaad codsatay, waxa muhim ah inaad fahamto waxa ku xiga ee dhacaya.

1. **Kaydso nuqulkaaga codsiga aad dhiibatay.** Waxad u baahan kartaa inaad dib u fiirsato mar dambe sidaad u xaqiiqsato taariikhda aad codsatay, dugsiyada aad dooratay, ama qofkii ku caawiyey.
2. **Guriga u qaado nuqulka "Soo Bandhigida Dugsiyada Dadweynaha Boston 2009."** Meel haboon dhigo buugan xogtu ka buuxdo sanad dugsiyeedka oo idil. Waa agab faa'iido badan oo leh lamabarada telefanada, faahfaahin balaadhan xaga hanaanka meelaynta, iyo xogta dugsi walba.
3. **U feejignow ogeysiinta meelaynta dugsi ee ilmahaaga.** Meelaynta dugsi ee Sebtembar 2009 waxa gurigaaga boosta laguugu soo dirayaa qiyaasta lix wiig kadib marka la xidho xiliga diiwaangelinta.

Hadaad codsatay...	Ogeysiin waxa la soo dirayaa...
Janaayo 5 - Febraayo 6, 2009	Badhaha Maarso 2009
Febraayo 11 - Maarso 20, 2009	Horaanta Maaajo 2009
Maarso 23 - Maaajo 1, 2009	Badhaha Juun 2009
Maaajo 4 - Juun 5, 2009	Badhaha Julay 2009
Kadib Juun 5, 2009	Marka meelaynta la sameeyo (waa kala bedelan tahay)

Ogeysiinta meelaynta waxa ku jiri doona:

- Dugsiga ilmahaaga lagu meeleeyey, ay ku jirto cinwaanka iyo saacadaha sanadka soo socdo.
- Uqalanka gaadiidka - in ilmahaagu bas leeyahay iyo in kale digsiya uu ku qoran yahay geeyay oo ka keena. (Warar dheeraad ah xaga gaadiidka "baska jaalada ah", ay ku jiraan wadooyinka basaska, iyo in boosta loo soo dhigo qoysaska u qalma bisha Agost dhamaadkeeda. Wixi su'aalo ah? Wac 617-635-9046 ama 617-635-9520.)
- Haday saamayso, dugsiya (-yada) lagu qoray ilmahaaga xaga liiska sugida (fiiri boga dambe).

Hadaan ilmahaaga lagu meelayn dugsiya aad dooratay:

- Ardayda fasalada 1-12 iyo xanaanada noqonaya 6 ama ka weyn Diisambar 31, 2009 waxa si toos ah loogu meelaynayaa dugsi gurigooda ku dhow ee kursi ka banaan yahay.
- Ardayda xanaanada ee noqonaya 5 sano ama ka yar Disambar 31, 2009 laguma meelaynayo dugsi aadan liiska ku qoran. Ardaydan waxa lagu qorayaa "lama meelayn" ilaa qoysasku sameeyaan doorashooyin kale xaga dugsiyada kuraasi ka banaan tahay. (Firi "Sidee u samayn karnaa doorashooyin cusub ee dugsi?" boga dambe.)

4. **U feejignow arjigaaga "Jawaabcelinta (RSVP).** Waxan ka codsanaa qoyska walba inay noo sheegaan inay aqbaleen iyo in kale meelayntooda dugsi ama meesha ay liiska sugida k geleen. Buuxi oo soo celi arjiga "RSVP" ee tusaya qorshahaaga Sebtembar. Xogtani waxay nagu caawinaysaa inaan u fidino kuraata jirta sida ugu degdegsan ee suurtoagal ah qoysaska kale.
5. **Diyaar u noqo bilawga dugsi!** Maamulaha ama madaxa dugsiya ilmahaagu wuxu kugula soo xiriirayaa warar dheeraad ah xaga kulamada aqalada furan iyo fursadaha ee soo dhoweynta qoysaska cusub ee bulshada dugsiya.

Xaga liisaska sugida...

- Hadaan ilmahaaga lagu qorin dugsiya doorashadaada kowaad, isaga ama iyada waxa lagu qori karaa ilaa sadex meelood ee liisaska sugida.
- Derejeda ilmahaagu kaga jiro liiska sugida waxay ku salaysan tahay mudnaantiisa/teeda dugsiyaas, lambarka aan sugnayn (random number) iyo xiliga diiwaangelinta ee qoyskiinu codsiya sameeyey.
- Ma jiro "dhamaystir" dhererka liiska sugida.
- Hadii kuraasi banaanaato, waxa toos looga samaynayaa meelayn liiska sugida ilaa badhaha Agost. Waqtigaas kadib, waanu kula soo xiriiraynaa kahor intaan ilmahaaga lagu meelayn liis sugitaan. Hadaad ku qanacdo meelaynta ilmahaaga oo aadan rabin in toos lagaaga meeleeyo liiska sugida, fadlan buuxi arjiga "RSVP"-ga ama la xiriir Xarumada Qaxtarmada Qoyska midkood si looga tirtiro magaca ilmahaaga liisaska sugida.
- Arday walba ee ku nool Magaalada Boston wuxu ku jiri karaa liiska sugida DDB xataa kadib marka sanad dugsiyeedku bilaabmo, iyadaan loo eegin in ardayga lagu meeleeyey DDB iyo in kale.
- Liisaska sugidu waxay dhamaanayaan aakhirka bisha Janaayo 2010.
- Fiiri buuga "Soo Bandhigida Dugsiyada Dadweynaha Boston" xaga tafasiisha nidaamka liiska sugida.

Su'aalaha...

Sidee u samayn karaa doorashooyin cusub ee dugsi?

Kadib markaad heshay ogeysiinta meelaynta, waad ku soo noqon kartaa mid ahaan Xarumada Waxtarmada Qoyska (Family Resource Center -FRC) sidaad u samayso doorashooyin dugsi ee cusub, xataa hadii ilmahaaga lagu meeleeyey mid ahaan dugsiyadii aad dooratay. Fadlan ogow, sideedaba, inaan balanqaad jirin in meeli ka banaan tahay dugsi (-yada) cusub aad codsato.

Maxaa dhacaya hadaan guuro kadib markaan codsigayga sameeyey?

Hadaad u gurto cinwaan cusub, isla markiiba nala soo socodsii sidaad warar muhim ah uga hesho boosta. Sidaad u cusboonaysiiso cinwaankaaga, booqo Xarumada Waxtarmada Qoyska midkood adoo sita ugu yaraan sadex cadaymood ee cinwaankaaga cusub. Xaga tafaasiisha Nidaamka Degenaanshaga (Residency Policy), wac Xarumada Waxtarmada Qoyska midkood, fiiri buuga "Soo Bandhigida BPS" ama booqo www.bostonpublicschools.org/residency. Hadii cinwaankaaga Boston ee cusubi uu ku yaal aag cusub xaga meeleaynta, waxa lagaa rabi karaa inaad samayso doorashooyin dugsi ee cusub. Qoysaska ka guura Magaalada Boston gudaheeda uma qalmaan inay galaan Dugsiyada Dadweynaha Boston.

Caawimo ma u baahan tahay? Booqo ama wac Xarumada Waxtarmada Qoyska midkood:

Aaga Bari 1216 Dorchester Ave., Dorchester 617-635-8015
Aaga Waqooyi 55 Malcolm X Boulevard, Roxbury 617-635-9010
Aaga Galbeed 515 Hyde Park Avenue, Roslindale 617-635-8040

Xaga Web-ka: www.bostonpublicschools.org/register

